

# Waa maxay sababta boosteejada Lake Street/Midtown loo cusboonaysiiyay?

Boosteejada Lake Street/Midtown waa saldhigga ugu mashquulka badan ee METRO Blue Line ee woqooyiga garoonka diyaaradaha, iyadoo ku dhawaad 800,000 oo rakaab ah ay raacaan sannadkii. Boosteejadan oo ka kooban laba dabaq oo shaqaynaysay ku dhawaad 20 sano ayaa lagu wadaa in lagu sameeyo dib u casriyeyn taasoo faa'iido u leh macaamiisha iyo bulshadaba sanadaha soo socda.

Jidka 21 waxa uu kaga dhacaa METRO Blue Line boosteejada waxuuna noqday sida goobta rakaabka ugu badan ay ka raacaan Boosteejada tareenada korontada waa barta isku xirka muhiimka ah ee mustaqbalka METRO B Line.

## ***Hadafka cusboonaysiinta boosteejada***

- U fududaynta dhammaan macaamiisha, iyadoon loo eegayn kartidooda ama baahidooda, si ay ugu isticmaalaan aagga Lake Street iyo goobta tareenka korontada si la isku halleyn karo
- Naqshadeyn ta albaab soo dhaweyn leh oo laga soo galoo boosteejada ku wajahan Waddada Lake Street
- Korbinta khibrada macmiilkha iyo adeegyada
- Iisticmaalka agabyo dhisme oo badbaado leh, waara oona si fudud loo dayactiri karo
- Isku darka nashqada boosteejada iyo meelaha ku hareeraysan sida Market Square iyo waddooyinka isku xira

## ***Waqtiga***

• 2022-2023	• 2024	• 2025-2026	• 2026
<b>QORSHAYNTA</b>	<b>DHISMAHA WADADA</b>	<b>DHISMAHA BOOSTEEJADA</b>	<b>U FURAN ADEEG</b>

Qorshaynta fikradda dib u cusboonaysiinta boosteejada waxa ay bilaabatay 2022, iyada oo nashqadeeynta iyo ka qaybgalka bulshada oo bilaabmayo 2023. Dayactirka boosteejada, oo ay weheliso beddelka jidka tareenka korontada ee la qorsheeyay, ayaa la filayaa inuu dhaco 2025-2026.

Markii la gaaro 2024, waxaa jiri doona mashruuc lagu hagaajinayo isgoyska Hiawatha-Lake. Waa dadaal wadajir ah oo ay ku lug leeyihii Hennepin County, Magaalada Minneapolis, iyo MnDOT. Waxay ka wada shaqayn doonaan sidii ay isbeddel ugu samayn lahaayeen waddooyinka iyo dhulka ku xeeran. Iyada oo qayb ka ah mashruucan, boosteejada METRO B Line ee ku teedsan Lake Street sidoo kale waa la dhammeyn doonaa.

## Kordhinta muddada gaaban

Marka laga soo tago da'deeda, boostejadu waxa soo gaadhay burbur laxaad leh saddexdii sano ee la soo dhaafay. Dayactirka degdega ayaa mid aad muhiim iyadoo ay tahay sababta in dad badan ay halkan ka raacaan tareen maalin kasta.

Markay ahayd 2022 iyo horraantii 2023, farshaxan ayaa lagu daray dhismaha bannaankiisa si looga hortago burburka; muraayado burburay iadoo calaamadihiina laga bedelay boostejada oo dhan, waxaana dayactir lagu sameeyay jaranjarada shubka ah. Macaamiishu waxay sii wadi doonaan inay arkaan hagaajinada iyo dayactirka boostejada hadda jirta ka hor dayactirka. Xagaaga 2023, waxaa jiro isbedello xiiso leh oo soo socda:

- Nadiifinta wiishka iyo dayactirka waaweyn
- Nadiifinta iyo dayactirka jaranjarada
- Ku samaynta farshaxan gudaha goobaha caamka ah
- Beddelka muraayadaha
- Ku hagaajinta madasha wax la taaban karo
- Nadiifin qoto dheer
- Korjoogteynta amniga joogtada ahna 24/7

## Akhbaaraadka mashruuca

Ka ogow wax badan oo ku saabsan mashruuca, sida akhbaaraadka ka soo cusboonaado iyo fursadaha aad kaga qayb qaadan karto naqshadaynta, adigoo booqanaya [metrotransit.org/hi-lake](http://metrotransit.org/hi-lake).

**CIDA LAGALA XIRIIRAYO  
MASHUUCA:**

Cody Olson  
[hilake@metrotransit.org](mailto:hilake@metrotransit.org)  
612-248-0642

